



# Xalka khilaafka qoyska: xalinta arrimaha sharciga qoyska ee ka baxsan maxkamadda

Furitaanka iyo kala maqnaanhsha way adkaan kartaa, gaar ahaan haddii aad haysato carruur. Wuxaan dareemi kartaa walbahaar ku saabsan go'aamada kala duwan ee aad u baahan tahay inaad ka gaadho waxa ku saabsan qaban qaabooyinka iyo arrimaha dhaqaalah.

## Dhokumentigan waxa

- ku siin doonaa qayb macluumaadka guud ee ku saabsan noocyada kala duwan nidaamyada xalinta khilaafka qoyska, oo loo
- caawiyo fahanka dookhyada laguu heli karo adiga si ay kaaga caawiso inaad la heshiiso lamaanahaagii hore iyaddoon maxkamadda la tegin.

## Boggana

- Xalinta Khilaafka Qoyska
- Helida macluumaadka sharciga iyo talada sharciga
- Marka xalinta khilaafka qoysku waxa dhici karta inaanay habboonay -- badbaado si leh iyo walaacyada kale
- Faraqyada u dhixeyya wada hadalka, dhedhexaadinta iyo sharciga wada shaqaynta
- Sida go'aan looga gaadhay waxa habka xalinta khilaafka qoysku uu yahay waxa uu ku habboon yahay qoyskaaga
- Goormaad u baahan tahay inaad tagto maxkamadda
- Adeegyada cadaalada qoyska ee gobolkaaga

## Xalinta Khilaafka Qoyska

'Nidaamka xalka khilaafka qoyska' waa eray bixinta cusub ee Xeerka Furitaanka. Waxaa loo isticmaalaa in la sharaxo tirada nidaamyada qoysaska ka baxsan jeebka ay isticmaali kara si ay u xaliyaan arrimaha sida daryeelka waalidka, masruufka carruurta, iyo arrimaha qayb qoysaska ah, hantida. Wada hadalka, dhedhexaadinta, sharciga wada shaqaynta leh iyo dhedhexaadintu waa noocyada xalinta khilaafka qoyska ee hoos lagu sharaxay.

### Isticmaalka xalinta khilaafka qoyska: waajibaadyada sharciga cusub

Bisha Juun 21, 2019 Baarlamaanku waxay ku sameeyeen isbeddelada Xeerka Furitaanka ee saameeya xalinta khilaafka qoyska. Isbeddeladan waxaa lagu dabaqayaa Juulay 1, 2020.

Doorashooyinka xalinta khilaafka qoyska aan u baahanayn adigu inaad maxkamadda tagto, sida dhexdhexaadinta, hadda ka hor waa laguu heli karaa adiga. Waxa cusub waa in Xeerka Furitaanka uu sheegayo inaad u baahan tahay inaad ku xaliso arrimahaaga sharciga qoyska addoo isticmaalaya xalinta khilaafka qoyska, haddii ay habboon tahay, <https://www.justice.gc.ca/eng/fl-df/pub.html>.

La taliyayaasha sharciga waxay qabaan waajibka inay adiga ku dhiirigeliyaan – sida macmiilkooda – si la isugu dayo in lagu xaliyo arrimaha iyaddoo la marayo nidaamka xalinta khilaafka qoyska, iyaddoo haddii kale si cad aan u habboonayn in sidaas la sameeyo mooyaane.

Waxaa jira qaabab badan oo dadku ay ku gaadhaan go'aanada ee ku saabsan arrimaha la xidhiidha kala maqnaanshaha ama furitaanka. Wuxaa go'aan ka gaadhi kartaa habka aadka kuugu habboon adiga iyo qoyskaaga. Dhib ma leh waxa uu yahay nidaamka aad isticmaasho, waa muhiim in xooga la saaro ee danta ugu fiican carruurtaada.

### **Faa'iidooyinka ku xalinta dhibaatooyinka heshiiska**

Waxaa jira faa'iidooyin badan ee ku xalinta dhibaatooyinka heshiis beddelka in uu go'aanka kuu gaadho adiga garsoore:

- waxaad fahmantaa baahiyaha carruurta
- xalinta khilaafka qoyska wuu ka qiima jabnaan karaa oo ka degdeg bataan in maxkamadda la tago
- Way kuu wanaagsanaan kartaa adiga si loo arko waalidka oo ka wada shaqaynaya
- qayb nidaamyada xalinta khilaafka qoyska waxay caawin kartaa horumarinta kartida si loo wada xidhiidho

Sida waafaqsan Xeerka Furitaanka cusub, waalidku waxaa ku waajib ah inay ka ilaaliyaan carruurtooda la xidhiidhinta khilaafka daryeelka waalid iyo arrimaha taageerada. Maclumaadka dheeraadka ah ee waajibaadka koxoaha waxaa laga heli kara ahalkan (Xaashida Xaqiqida – Waajibaadyada kooxxaha).

### **Helida maclumaadka sharciga iyo talada sharciga**

La taliyaha sharciga waa qof kasta oo takhasus u haysta inuu ku siiyo talo sharii ama ku metelo adiga xaalada waafaqsan Xeerka Furitaanka. Tan waxaa ka mid ah qareenada, laakiin sidoo kale kuwa kale ee uqalma gobolkaaga. Tusaale ahaan, Quebec nootaayooinkeeda waxay bixin karaa talada sharciga ah ee qoyska.

Arimaha sharciga qoyska way adkaan karaan. La taliyaha sharciga waxa uu ku caawin karaa wakhtiyoo kala duwan iyo qaabab kala duwan dhammaan kala maqnaanshahaaga ama furitaanka. Waxay sharaxi karaan

- xuquuqdaada sharciga ah iyo masuuliyadaha iyo kuwan kuwa kale
- doorashooyinkaaga
- sida arrimaha sharciga ah la isugu xidhi karo
- sida maxkamaddu u shaqayso
- sida degdega ah ee arrimaha ay dhici karto in loogu xaliyo dhexda maxkamadda iyo nidaamyada xalinta khilaafyada qoyska
- faa'iidooyinka iyo khasaaraha in la heshiyo ama amar maxkamadeed

Waxaa lagu talinayaan inaad la hadasho la taliye sharci **ka hor** aanad saxeexin qorshaha daryeelka waalidka ama heshiiska. Waxaa dhici karta inaad ilowday shay muhiim ah oo ay kuu sharaxi karaan adiga.

Haddii aad carruur leedahay, dugsiyo, iyo waaxaha dowladda waxay u baahanaan karaan adigu inaad siiso nuqul heshiiskaaga qoran ah ama amar maxkamadeed. Dhokumentigan waxa uu ogaysiin karaan ka uu yahay waalidka qaadan kara ilmaha iyo midka gaadhi kara go'aamada muhiimka ah ee ku saabsan carruurtaada. La taliyayaasha sharciga waxay hubin kartaa dhokumentigaaga inay cad yihiin oo si fudud loo fahmi karo.

Raadinta caawimada la taliyaha sharciga ah gaar ahaan muhiim ayay noqon kartaa dacwadaha halka ay jireen rabshada qoysku, isticmaalka maandooriyaha, ama jirada maskaxda khatarta ah. Macluumaad badan oo ku saabsan rabshada qoyska waxaa laga heli kara halkan (Ku xidh Xaashida Xaqiiqda marka la heli karo).

### **Marka xalinta khilaafka qoysku ma habboono -- walaacyada badbaadada.**

Noocyada gaarka ah ee xalinta khilaafka kuma habboonaan karto marka lagu daro xaaladaha khilaafka sare, awooda aan isku dheeli tiranayn ee rabshada qoyska.

Tusaale ahaan, haddii hal waalid uu maamulayo, waalidka kale awood uma yeelanayo inay nafahooda u hadlaan ama carururtooda marka labbada waalid ay ku jiraan qol isku mid ah.

Dhexdhedaadiyayaasha la aqoonsan yahay iyo xirfad yaqaanada cadaalada qoyska ee kale waxay ku waydiin doonaan wax ku saabsan rabshada qoyska iyo astaamaha kale si loo caawiyo in go'aan laga gaadho ka uu yahay habka xalinta khilaafka waa uu habboon yahay gudaha duruufaha. Haddii aad walaac ka qabto xalinta khilaafka qoyska waxa ku saabsan, waa muhiim inaad kala hadasho iyagu inay arkaan haddii xalku uu suuragalka yahay.

## **Faraqyada u dhexeeya wada hadalka, dhexdhedaadinta, sharciga wada shaqaynta iyo dhexdhedaadiska.**

Waxaa jira qaabab badan oo sharciga khilaafka qoyska loogu xalin karo dibada qolka maxkamadda. Xeerka *Furitaanka* cusub waxa uu sheegaa wada hadalka, dhexdhedaadinta iyo sharciga wada shaqaynta. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira qaabab kale oo xalinta khilaafka qoyska ah. Gobolada qaarkood waxay oggolaadaan isticmaalka dhexdhedaadinta si loo xaliyo khilaafyada sharciga qoyska.

Go'aan ka gaadhida ka uu yahay habka kugu habboon adiga waxay ku xidhnaan doontaa xaaladaada.

### **Wada hadalka**

Wada hadalka waxaa lagu samayn kara iyaddoo leh ama aan lahayn caawimada la taliyaha sharciga. Waxay ku lug leedahay falan qaynta u dhaxaysaa adiga iyo xaaskaaga hore inaad isku daydaan inaad la timaad heshiis dhexdhedaad ah ama heshiis ku saabsan arrimaha la xidhiidha kala maqnaanshaha iyo furitaanka.

**Qorshaha daryeelka waalid** waxa uu muujiya sida waalidka ay u barbaarin doonaa carruurtooda ka dib kala maqnaanshaha ama furitaanka. Qorshayaasha daryeelka waalidu waxay sharaxaan sida waalidka aan wada noolayn u daryeli doonaa oo ay u gaadhi doonaan go'aamo muhiim ah oo ku saabsan carruurtooda labbada guriba. Wuxaan la iman kartaa qorshaha daryeelka dhexda mid kastoo ka mid ah qaababka xalinta khilaafka qoyska. Macluumaadka dheeraadka ah ee qorshayaasha daryeelka waalid eeg: <https://www.justice.gc.ca/eng/fl-df/pdf/fsfdr-firdf-eng.pdf>

### **Sharciga wada shaqaynta**

Sharciga wada shaqaynta waa nooc gaar ah ee wada sheekaysiga. Sharciga wada shaqaynta, adiga iyo lamaanahaaga hore, la taliyayaasha sharciga ah iyo xirfad yaqaano kale (tusaale, la taliyayaasha dhaqaalah, xirfad yaqaanada caafimaadka maxkada ama xisaabiyayaasha) waxay aqbaleen inay wada shaqeeyaan. Muddada nidaamka wada shaqaynta, adiga iyo lamaanahaaga hore waxay aqbaleen inaanay soo qaadan wax codsiyada maxkamadda ah.

### **Dhexdhedaadin**

Dhexdhedaadiyahu waa kooxda saddexaad ee dhexdhedaadka ah oo caawin kara adiga iyo lamaanahaagii hore inaad aqoonsataan oo ka wada hadashaan arrimaha la xidhiidha daryeelka waalidka, kala maqnaanshaha ama furiinka.

Dhexdhedaadiyayaashu waxay kaa caawin karaan aqoonsashada arrimaha oo waxay ka shaqeeyaan xalalka suuragalka ah. Mudada dhexdhedaadinta, adiga iyo lamaanahaagii hore waxaa toos isugu sheegtaa waxa aad doonayso oo u baahan tahay laftaadu. Haddii aad leedahay carruur, waxaad sidoo kale odhan kartaa waxa aad rumaysan tahay inuu yahay danta ugu fiican carruurtaada.

Dhexdhedaadiyahu cidba dhinaca ma saaro ama go'aan adiga kuuma gaadho. Sidoo kale ma bixin karaan talada sharciga ah. Marka dhexdhedaadiyaha uu caawin doono

adigu inaad gaadho heshiiska, dhammaadka adiga iyo lamaanahaaga hore waxaad gaadhaa go'aamada ay ku jiraan kuwan ku saabsan qaban qaabada daryeelka waalidka ugu wanaagsan ee ilmahaaga.

Sababtoo ah dhedhexaadinta caadi ahaan waxay ku lug leedahay falan qaynta tooska ee qofka kale, kuma haboona qof kasta. Tusaale ahaan, haddii kuwan ay ahaayeen dagaalka dhemara qoyska oo ay jiraan walaacyada badbaadada joogta ah, suuragal kuuma ahaan doonto adiga iyo qofka kale inay u dhedhexaadistaan si badbaado iyo waxtarba leh.

Xaaladaha qaarkood, qaababka kale ee dhedhexaadinta way ka wanaagsan yihiin. Tusaale ahaan, **dhexdhexaadinta labbada meelood la kala joogo**, adiga iyo lamaanahaagii hore uma baahna inay isku qol ku jiraan. Dhedhexaadiyahu waxa uu la hadlaan hal qof, oo ka dib qofka kalena si gooni ah. Adiga iyo lamaanahaaga hore waxay ku wada hadashaan caawimada dhedhexaadiyaha, iyaddoon foolka fool ahayn.

Waxay ahaan kartaa suuragal in lagu dhedhexaadiso meelo kala duwan iyaddoo la isticmaalayo teknoolajiga sida telefoonka ama wada sheekaysiga fiidyaha ah. Tusaale ahaan, waxaad samayn kartaa tan haddii adiga ama lamaanahaaga hore ay ku nool yihiin magaalooyin kala duwan.

## Dhexdhexaadinta

Gobolada qaarkood, arrimaha daryeelka waalid la xidhiidha, siiba hantida iyo arrimaha taageerada, waxaa lagu xalin karaa **dhexdhexaadiska**. Dhedhexaadiska, adiga iyo qofka kale waxaad aqbashaan inaad oggolaataan qof dhedhexaad ah—dhedhexaadisa—inuu go'aan ka gaadho arrimaha sharciga.

Dhedhexaadiska waa nidaam gaar ah oo adiga iyo lamaanahaagii hore waxaad masuul ka tiihin bixinta lacagta dhedhexaadiyaha, siiba lacagta la siinayo la taliyayaashaada sharciga ah (haddii aad leedahay iyaga). Dhedhexaadiska waxa uu noqonayaa nidaam aan aad u rasmi ahayn marka la barbardhigo xukunka maxkamadda.

## Isku xidhka daryeelka waalidka

Isku xidhka daryeelka waalidka waa nidaamka xooga saaraya ilmaha ee xalinta khilaafka qoyska. Waa xalinta khilaafyada daryeelka waalid ee soo baxa ka dib marka aad heshiiska gaadho ama nidaamka ku saabsan wakhtiga daryeelka waalidka, masuuliyada waalidka ama xidhiidhka u dhexeeyaa ilmaha iyo dadka kale ee muhiimka nolosha ilmaha. Isku xidhka daryeelka waalid waxa uu adeegsan karaan isku darka dhedhexaadinta iyo dhedhexaadiska si loo xaliyo khilaafyada daryeelka waalidka. Isku duwayaasha daryeelka waalidka waxay noqon karaan qareenada sharciga ee qoyska, xirfad yaqaanada caafimaadka maskaxda, shaqaalaha bulshadda, daaweeyayaasha qoyska, dhedhexaadiyayaasha, iyo kuwa dhedhexaadina.

## **Sida go'aan looga gaadhay mida uu yahay habka xalinta khilaafka qoysku waxa uu ku habboon yahay qoyskaaga**

Marka go'aan laga gaadhayo mida doorashada xalinta khilaafka qoyska adiga kuu fiican, waxaa jira waxyaabo badan oo laga fekerayo. Daabacada [Samaynta Qorshaha](#) waxay ka kooban yihiin maclumaadka caawimada badan ee ku saabsan daryeelka waalidka ka dib kala maqnaanshaha iyo furiinka. Tusaale ahaan, waxaad u baahan kartaa inaad ka fekerto inta uu leeg yahay khilaafka u dhexeeyaa adiga iyo waalidka kale.

Adigu waxaad sidoo kale go'aansan kartaa in aad qof hesho, sida garsoore ama dhexdhedaadiya, ay kuu gaadhaan go'aanadan adiga inay tahay doorashada kuugu fiican adiga iyo qoyskaaga.

### **Goormaad u baahan tahay inaad tagto maxkamadda**

Haddii adiga iyo lamaanahaaga hore aydaan heshiis gaadhi karin ama keliya aad awoodaan inaad ku heshiisaan arrimo dhowr ah, waxaad u baahan kartaan qof kale inuu adiga go'aanka kuu gaadho.

Dhexdhedaadiska waa qaab kuu oggolaada adiga qof kale inuu go'aanka kuu gaadho.

Sidoo kale waxaad tegi kartaa maxkamadda. Tegida maxkamdda waxay la macno tahay inaad waydiisanayso garsooraha inuu go'aan ka gaadho waxay tahay natiijooyinka kugu habboon adiga iyo qoyskaaga. Waa inaadan filan maxkamaddu inay ku siiso amar maxkamadeed si toos ah. Waxay qaadan kartaa wakhti dheer.

Waxaa jira tallaabooyin badan gudaha nidaamka maxkamadda, kaas oo kala duwanaan kara iyaddoo ku xidhan halka aad ku nooshahay. Xataa haddii aad ku dambayso tegida maxkamadda, maxkamaddu waxay kugu dhiiran gelin doontaa adiga iyo lamaanahaaga hore inaad heshiis ku gaadhaan qaab kale, haddii ay suuragal tahay. Xaqiiodii, garsooraha waxa uu isku deyo karaa inuu ku dhammeeyo dhibaatooyinka meel ka baxsan maxkamadda iyaga laftooda siiba – tusaalahaan nidaamka loogu yeedho shirka heshiiska. Xaga shirka dhammadaynta heshiiska garsoore waxa uu ku siyaa adiga iyo lamaanahaaga hore doorashooyinka sida qayb ama dhammaan arrimaha lagu dhammadaynta, iyaddoo in dheeraad ah la tegin nidaamka maxkamadda.

Siiba, maxkamadda gobolkaaga waxay adiga iyo lamaanahaaga hore ka qayb gelin kartaa qaab kale oo xalinta khilaafka ah ka hor intaan lagu dhaqaaqin tallaabada maxkamadda.

Haddii aydaan dhammadaynta heshiiska garsoore waxa uu qaban doonaa dhegaysi ama xukun, oo markaas waxa uu soo saari doonaa amar maxkamadeed. Waa inaad samaysaa waxa amarka maxkamaddu sheegayo.

Sidoo kale waxaad waydiin kartaa maxkamaddu inay ku darto heshiiska aad gaadhay amarka maxkamdda. Tan waxaa loogu yeedhaa “amaraka oggolaanshaha” sababtoo ah adiga iyo lamaanahaaga hore ayaa aqbalay iyadda. Nidaamaku aad ayuu uga fududa yahay midii ahayd marka kooxahu aanay ku heshiin.

### Xusuusnow

Waxaad ku xalin kartaa khilaafkaaga dibada meel ka ah maxkamadda dhexda xalka khilaafka qoyska, laakiin keliya maxkamadda waxay bixin kartaa furitaan. Marka garsoorahu bixiyo furitaanka, maxkamadda, waxay soo saari doontaa shahaadada furriinka ee bixinaysa in aanad in dheeraad ah xaas ahayn.

Waxaa jiri kara sababo kale oo aad ugu baahan tahay inaad hesho amarka maxkamadda. Tusaale ahaa, haddii aad doonayso heshiiska in loo aqoonsado sidii amarka maxkamadda gobol kale ama wadan, waxaad u baahan doontaa inaad tagto maxkamadda.

### Adeegyada cadaalada qoyska ee gobolkaaga

Adeegyada cadaalada qoyska miduun waa kuwa guud (waxaa lacagta siisa dowladda) ama adeegyo gaar ah (adigu aad siiso lacagta) oo ka caawiya dadka inay wax ka qabtaan arrimaha ka soo baxa kala maqnaanshaha ama furitaanka. Gobolada iyo dhulalku waxay leeyihiiin [adeegyada cadaalada qoyska](#) sida dhexdhedaadinta iyo kullamada maclumaadka daryeelka waalidka ee aad ka heli karto waxtar badan. Wuxuu sidoo kale ka heli kartaa adeegyada caawinta badan ee kale websaydka [dowladaada gobolka ama dhulka](#). Xirfad yaqaanada qaybta gaarka ah sidoo kale waxay bixin karaan adeegyada xalinta khilaafka gobolkaaga ama dhulkaaga.

### Linkiyad ala xidhiidha

- [Samaynta Qorshayaasha hagitaanka qaban qaabda daryeelka waalidka ka dib kala maqnaanshaha ama furitaanka](#)
- [Liiska magacyada qorshaha daryeelka waalidka](#)
- [Helida qorshaha daryeelka waalidka](#)
- [Hagayaasha Taageerada Ilmaha ee Federaalka ah: Tallaabo-tallaabo](#)